


arimaha qoyska



Waa warside ka soo baxa Dugsiyada Dadweynaha Boston si loo xoojiyo xiriirada guri-dugsi

Juun 2009 ★ www.bostonpublicschools.org

Fariinta Agaasimaha Guud:



Gacaliyeyaal Qoysaska,

Waxa dhacda inaad ku aragteen looxaan cusub oo iidheh ah magaalada gudaheeda kuwaas oo xayaysiinaya ololaha Dugsiyada Dadweynaha Boston ee "Talaabada Dambe, waa Kuliyad". Ardayda cajaa'ibka ah ee dugsiya sare kana muuqda looxaanta iidhehda waa xubna kuliyad u socda ee DDB Fasalka 2009.

Ardaydani waxay hanteen himiladii aan u qoon-daynay ardaydeena idil: inay aad u shaqeyaan, dibloome mutaystaan, oo u sii ambaqaadaan dhamaystirka kuliyad ama tababrka dugsi sare kadib. Hambalyo waxan u dirayaa kulli ku-maankunka xubnaha DDB Fasalka 2009 ee gaadhay bartilmaameedka aflaxaada qalinjebinta dugsi sare iyo qoysaskooda, shaqaalaha iyo saaxuubada ku taageerayey hilinkaas oo dhan.

Waxan ku faani karnaa in qiyaasta qalinjebintii afar-sanadlaha Fasalka 2008 ay boqolkiiba laba ka saraysey tii fasalkii sanadkii ka horeeyey, qiyaasta tirada ka tagtayna waxay gaadhay dhibicdii ugu hoosaysey mudo lix sano ah. Hase ahaatee, sida degmo-dugsiyeedada kale ee umadda, DDB waxay weli arkaan in arday tiro badani ka tagaan dugsiyada kahor intaanay ka qalin jebin. Waxana nala gudboon shaqo badan inaan qabano si aan u hanano himilada ah "Qalinjebinta Gidigood."

Xawliga Ajendaha waxa loo hindisey inuu u fidiyo arday walba saldhig tacliimeed ee adag min dugsi hoose, kan dhexe iyo kan sareba—iyo wixi ka dambeeya. Sida had iyo goorba, waxan u baahan nahay ka qaybgalkaaga iyo taageerkaaga joogtada ah, waxanna kuugu mahad celinayaa sidaad heegan ugu tahay caruurta Boston.

Niyadsamida ugu wanaagsan xaga kulayle farxad iyo nabad leh,

Carol R. Johnson
Agaasimaha Guud

Barashada sii wad marka dugsiyada xiran yahay!

Siyaabo fudud, fan ah, oon sicir lahayn/oo sicir hoose ee lagu tababarayo maskaxda caruurta kulaylahaan

Waa dhowaan xiritaankii dugsiya ee kulaylaha, caruurta badankooduna ma sugi karaan labada bilood ee fasaxa ah ayan lahayn shaqa-guri ama imtixaano. Laakin ma ogtahay waqtiga kulaylaha, cunuga caadiga ahi wuxu lumiyaa qiyaasta hal bil horu-kacii tacliimeed uu sameeyey waqtigi sanad dugsiyeedka? Sida dirasad Jaamicada Johns Hopkins qabatayna, 65 boqolkiiba faraqa hanashada (achievement gap) u dhexaysa caruurta qoysaska hantida kooban iyo caruurta qoysaska hantida dhexe waxa u sabab ah khibradaha waxbarasho ee kulaylaha.

Kaambada ama barnaamij kulaylaha ee tacliini ku jirto wuu caawiyaa. Laakin caruurta badankodu ma tagaan kaambo kulaylaha, kaambooyinka caadiga ah badankooduna waxay isha saaraan dheeldheelka meeshay ka bari lahaayeen akhris iyo xisaab. Maxay qoysasku samayn karaan siday u hubiyaan in caruurtooda ka shaqaysiinayaan maskaxdooda si ay "dhulka u cagta u saaraan iyagoo ordaya" bisha Sebtembar?

Nuqulkii Maarso ee *Arimaha Qoyska*, waxan ka hadalnay muhimada kor wax u-akhriska caruurta inta ugu badan ee suurtoagal ah. Taasna sii wad xiliga kulaylaha, oo hubi in caruurtaadu heli karaan buugag maalin kasta. Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo Maktabada Dadweynaha Boston waxay diyaariyaan liisas buugagta haboon in kulaylaha la akhristo. Buugagta kuligood waxa laga helayaa maktabada xaafadiina. Hadaan ilmahaagu liiska guriga ka keensan dugsiya, ka soo qaado maktabada ama booqo bostonpublicschools.org/summer. Laamaha Maktabada Dadweynaha Boston oo idil waxay kulaylaha leeyihiin barnaamijyo bilaash ah oo wax akhris iyo hawlaha la xirira ama dhiiri geliya.

Xirfadaha xisaabta khaasatan waxay muhim u yihiin in laysku carbiyo waqtiga kulaylaha—waxana jira maaweelooyin iyo hawlo badan oo sicir yar aad u jeedin karto caruurtaada siday xisaab ahaan ugu fekeraan.



Garaacida qalab muusiko waa arin weyn oo laysku carbin karo garashada naqshada, tirinta iyo jajabka.

Caruurta yaryar way tirin karaan waana cabiri karaan waxyaabaha ku xeeran ee guriga iyo dukaanka yaala, heesaha ku saabsan tirinta, iyo barashada naqshadaha iyagoo ku cayaaraya bolokeetiga ama "Lego". Kariska iyo dubidu waa wax weyn oo laysku carbin karo xaga cabiraada iyo jajabka. Cayaaro badan oo looxyada ama turubku waxay isticmaalaa tirinta, iskudarka, iyo kalajarida, isku sumad-

Summer learning ▶

Waxa kalee ku yaal nuqulkan

- 2 Cuntooyin caruureed kulaylaha bilaash ah , oo caafimaad leh
- 2 Ilmahaagu Ma Tegeyaa Dugsi Kulaylaha?
- 3 Udoorida Caruurta Warbaahin Tayo Sare leh
- 4 Kalendaariyaha Dugsiyeed 2009–2010

Summer Learning (continued)

aynta ama kala noocaynta. Markaas awoodo, ilmahaaga weydii su'aalaha sida: "Sidee ku ogaatay in koob nuskiis yahay laabanlaabka koobka rubuciis?" Waa muhim in ardaydu helaan jawaabta saxda ah—laakin waa inay isla markaas awoodaan inay sharxaan siday u heleen.

Agabyadanu waxay fikrado wacan siinayaan kulaylaha (iyo sanad dugsiyeedka) xaga fanka xisaabta:

- **Golaha Umadda ee Macalimiinta Xisaabta (NCTM)** waxa ifaafaalaha website-koodu leeyaha 102 tusaalooyin cayaaro iyo hawlo muujinaya fikradaha muhimka ah xaga xisaabta, iyo isla markaas xiriirada kale ee ka dhexeeya bogaga website-yada ay ku taliyeen golaha NCTM.

illuminations.nctm.org

- Website-ka **"First in Math"** wuxu leeyahay cayaaro iyo hawlo sii xoojiya fikradaha xisaabeed. DDB oo dhan ee dugsi hoose, kuwa dhexe iyo dugsiyada K-8 waxay siin karaan qaadhaano website-ka ardaydooda ilaa July 31. Weydii maamulaha dugsiya ilmahaaga haduu dugsiya ilmuhu bixiyo deeqdan, waxadna weydiisaa sidaad ula xiriiri lahayd.

firstinmath.com

- **"TERC Investigations"** waa shirkada daabacda manhajka xisaabta DDB. Website-yadani waxay leeyihiin cayaaro iyo fikrado ku lifaaqan manhajka o qoysasku ku isticmaali karaan internetka gurigooda:

- athomewithmath.terc.edu/math_kits.html

- tinyurl.com/p8sfz2 Tani waxay ku geynaysaa Pearson SuccessNet. Qor "Boston" xaga magaca (ID) iyo "Ilovemath" xaga baaqa (password). Kani wuxu ku geynaya boga "Student Math Handbook".


- **"Parents PLACE"**, Xarunta Xogta & Agabka Waalidka Massachusetts (Mass PIRC) qoraaladooda xaga waxbarashada bilawga caruureed iyo xisaabta waa la helaa iyagoo ku qoran Ingiriisi, Isbanish, iyo Bortuqiis.

pplace.org/publications/bulletin.php

☎ 877-471-0980

Dugsiya ilmahaagu ma leeyahay macalimiin heer sare ah? Xoghayn wax ku-ool ah? Nadiifiyeyaal daryeel badan? Maamule aan la gaari karin?

Xususnow inaad u mahad naqdo intaan dugsiya la xirin – runtii aad bay ugu qushuucayaan!



Cuntooyin Bilaash ah Kulaylaha, oo cafimaad leh

Xiliga kulaylaha, DDB iyo mashruuca **"Project Bread"** waxay ka siiyaan caruurta quraaco iyo qadooyin bilaash ah qiyaasta ah 200 meelood ee magaalada ku yaal. Meelaha cuntooyin kulaylaha waxay ku yaaliin dugsiyada, dhulbeereedka, meelaha dabaasha, xarumada bulshada, buqcadaha ururada adeegyada dhaqanka, iyo kaniisadaha. Wax diiwaangelin ama aqoonsi ah looma baahna, caruurtana lagama rabo inay tagaan barnaamijyada si wax loo siiyo.

Wixi xog dheeraad ah:

- 617-723-5000, Project Bread
- projectbread.org – garaac "Ending Hunger" xaga wixi xog buuxda iyo agabyada cuntada.
- meals4kids.org – Ka raadi barnaamijyada xaafadaha Boston.

Isbedelada soo socda xaga Ku-Meelaynta Dugsiyada iyo Gadiidka?

Agaasimaha Guud Johnson waxay soo horadhigtay bulshada iyo Gudiga Dugsiyada Boston (BSC) talo ah in lagu bedelo sadexaaga dugsiyeed ee hada ka jira mid shan aag ah, iyo qorsheyaal lagu dhimay kharashyada gaadiidka iyo ajende hanweyn oo lagu xaqiijinayo dugsiyo tayo sare leh.

Ilmahaagu ma tegayaa dugsi kulaylaha?

Ardayda qaar badan baa u baahan caawinaad dhheeraad ah siday u daboolaan shurrudaha ugudbintooda heerka fasalka ka sareeya ee dugsiya. DDB waxay leeyihiin barnaamij kulaylaha iyaga loogu tala galay: Barnaamijkan afar-wiigalaha ah lana dhaho Kulaylaha Barnaamijka Kagudubka waa ardayda fasalada 3-9, 11, iyo 12. Dugsiyadu waxay ogeysiisyo u dirayaan Juun dhamaadkeeda qoysaska ardayda laga rabo inay ka qayb galaan Kagudubka Kulaylaha.

Miliilica DDB Kagudubka Kulaylaha:

- **Taariikhaha Barnaamijka:** July 6-30, 2009

- **Saacadaha:** Isniin-Khamiis, 8:15-1:15 ama 9:15-2:15

- **Meesha:** 50 Dugsi ee DDB. Sida ka duwn sanadihii hore, dhamaan ardayda loogu adegayo barnaamijka Kagudubka Kulaylaha waxay dooran karaan meelaha ay rabaan. Boga "Kulaylaha" ee website-ka DDB waxa ku qoran liisaska meelaha idil ee barnaamijyada kulaylaha. Gadiidka lama bixiyo waxse ka reeban sida la rabo dadka naafada ah ee IEP.

- **Xaadiirada:** Waa waajib. Ardayda ka baaqata in ka badan laba casho waa laga saarayaa barnaamijka.
- **Dugsi kadib:** Xarumada Boston ee Dhalinta & Qoysaska (Boston Centers for Youth & Families -BCYF) meelay uga baneeyeen barnaamijyadooda kulaylaha ardayda gala barnaamijyada BCYF. Hadaba la hadal dugsiya ilmahaaga sidaad u ogaatid helitaanka jagooyinkan.

Su'aalo?

- La xiriir dugsiya ilmahaaga.
- bostonpublicschools.org/summer

Wixi isbedeloyo ay ku sameeyaan Gudidda BSC waxay hirgelayaan meelaynta dugsiyada September 2010. *Ma jirayaan wax isbedeloyo ah xaga meelaynta ardayda sanad dugsiyeedka 2009-2010.*

Xaga xogta ugu dambaysa:

- bostonpublicschools.org/zones

Dugsiyada Dadweynaha Boston Xarumada Waxtarmada Qoyska (FRC) Saacadaha Kulaylaka

Juun 29–July 31, 2009:

FRC-da Aaga Bari keliya
1216 Dorchester Ave., Dorchester
Isniin–Jimce, 8:30 ar–5:00 gal.
Xiran, July 3
☎ 617-635-8015

Min Isniin, Agost 3, 2009:

Dhamaan Xarumada FRCs waa furan
yihiiin Isniin–Jimce 8:30 ar–5:00 gal

Xarumada gacanyaraha ah:

Allston/Brighton FRC ee dugsiya Jackson/
Mann School waxa si joogto ah loo
xirayaa laga bilaabo Juun 18.

East Boston FRC ee Akademiga Dhexe
Umana waxa la xiraya 23–Agost 28.

Tafaasiil:

bostonpublicschools.org/register

Udoorida Caruurta Warbaahin Tayo Sare leh

Xakamaynta “waqtiga shaashada” caruurta
daawato waa arin culus, siiba xiliga
kulaylaha. Qoysaska qaarkood heshiis bay
sameeyaan: hal saac oo akhris ah waxa lagu
“iibsanaya” saacad TV-ga ah.

Waqtiga caruurtaadu ku jiraan cayaaraha
fidiyooga ama daawanayaan DVD-ga, agab-
yadani waxay kugu caawinayaan doorashada
warbaahin tayo sare leh, oo da’da ilmaha ku
haboon.

► **Warbaahinta Caqligalka** ahi waxay ku
caawisaa qoysaska inay baraan caruurta
siday ku noqon lahaayeen kuwo badbaado
iyo xariifnimo ka hela aduunka warbaa-
hinta. Website-koodu wuxu bixinayaa
talooyin khihrad leh iyo faalooyinka
kumaankun shancemo, DVD-yo, cayaaro,
iyo barnaamijyada TV-ga.
commonsensedia.org

► **Hay’ada Doorashada Waalidku** waxay siisaa
abalgudyo waxyaabaha la soo saaro kuwa
ugu wanaagsan xaga caruurta da’aha,
dhaqmaatiga, xirfadaha, iyo danaha kala
duwan leh. Abalgudyada waxa la siiyaa
waxyaabaha la soo saaro kuwa daboolaa
ama ka sii sare mara cabirada ay dhigeen
macalimiintu, aqooyahanada, hoobalada
maaweelada, maktabadyahannada, waa-
lidka, iyo caruurta laftooda.
parents-choice.org

Arimaha Qoyska

Faafintan waxa soo saaray Xafiiska Isgaarsiinta Dugsi-
yada Dadweynaha Boston, oo ay iskaashadeen Hay’ada
Waalidka PLACE, Xarunta Xogta & Agabka Waalidka
Maachusetts (PIRC)

DUGSIYADA DADWEYNAHA BOSTON

26 Court Street ■ Boston, MA 02108

bostonpublicschools.org

☎ 617-635-9000

GUDIGA DUGSIYADA

Rev. Gregory Groover Sr., Gudoomiye
Marchelle Raynor, Gudoomiye K/Xigeen
Helen Dajer ■ Alfreda Harris ■ Claudio Martinez
Michael O’Neill ■ Elizabeth Reilinger

Carol R. Johnson, Agaasimaha Guud

BAYAANKA MAWQIFKAYAGA

Waa inaan ku soo dhoweynaa caruurta magaaladan
Dugsiyada Dadweynaha Boston, halkaas oo waxbarid
wax ku-ool ah iyo waxbarasho loogu diyaariyo ar-
daydeena oo idil si ay u hantaan heerar sareeya, iyadoo
isla halkaas bulshada oo dhami iskuduubni u wada
shaqeyaan siday indhaha ugu hayaan caruurta.

NIDAAMKA TAKOORLA’AANTA

Dugsiyada Dadweynaha Boston waxayan sinnaba cid
ugu takoorin wax ku salaysan jinsiyadda, midabka,
da’da, naafada, lab iyo dhedig, diinta, asalka um-
madeed, ama dhaqanka balwada himadda, umana
dulqaataan nooc kasta oo takoor ah, hanjabaad, baqdin
gelin, khasbid, iyo/ama qashqashaad.

**Arimaha Qoyska waxa la helayaa
iyagoo ku qoran Somaali ee
www.bostonpublicschools.org
iyo dugsiya ilmaahaaga.**

- *Asuntu di Familia* sta dispunivel na **Kabuverdianu** na www.bostonpublicschools.org y na skola di nhos kriansa.
- Nou gen *Family Matters* disponib an **Kreyòl Ayisyen** nan www.bostonpublicschools.org, epi nan lekòl pittit ou an tou.
- 家庭事態 是用中文印發, www.bostonpublicschools.org 網址和孩子的 學校 備索。
- *Assuntos de Família* está disponível em **português** no www.bostonpublicschools.org e na escola dos seus filhos.
- *Asuntos de Familia* está disponible en **español** en www.bostonpublicschools.org y en la escuela de su hijo/a.
- *Arimaha Qoyska* waxa la helayaa iyagoo ku qoran **Somaali** ee www.bostonpublicschools.org iyo dugsiya ilmaahaaga.
- Quý vị có thể tìm đọc bản tin *Family Matters* bằng tiếng **Việt Nam** tại trường của con em quý vị hoặc trong trang web: www.bostonpublicschools.org.



Cayaaryahannadu waxay saf u taagan yihiin garabka looxa lagu qoro waxa cayaarta la kala helo ee barxada Fenway Park kahor bilawgii Cayaartii Kubada Kolayga Taariikhiga ah ee Reer Bostonoo Idil ee 2008 (Boston All-City Baseball Classic). Tartankan sanadlaha ah wuxu tusaa xirfadaha cayaartoyga kubada kolayga oo metelaya 15-ka dugsiyada sare ee Boston. Sanadkan cayaartu waxay bilaabmaysaa Talaadada, Juun 23 saacada 3 galabti. Albaabada waxa daawadayaalka loo furayaa 2:30. Soo kaxee qoyska, u qayli dugsiyada aad jeceshahay, kuna istareex galbtaas Barxada Saaxiibtinimada Fenway. Gelitaanku waa bilaash! Waxa soo agaasimay kooxda Boston Red Sox. Wixi xog dheeraad ah: ☎ 617-635-4920 fid. 2145



- August 25-27 New Teacher Institute: First-year teachers report
- September 7 Labor Day: No school
- September 8-9 All teachers and paras report
- ▲ September 10 Students in grades 1-12 report, including grade 1 in ELCs and EECs: Full day of school
- ◆ September 14 Kindergarten students report, including EECs and ELCs
- September 15 Students in Special Education Early Childhood programs report
- October 12 Columbus Day: No school

- November 11 Veterans' Day: No school
- November 25 Early release for students and staff
- November 26-27 Thanksgiving Recess: No school
- December 24-January 1 Winter Recess: No school
- January 4 Students return from recess
- January 18 M. L. King Jr. Day: No school
- February 15 Presidents' Day: No school
- February 16-19 February Recess: No school
- February 22 Students return from recess
- March 17 Evacuation Day: No school
- April 2 Good Friday: No school
- April 19 Patriots' Day: No school
- April 20-23 Spring Recess: No school
- April 26 Students return from recess
- May 31 Memorial Day: No school
- * June 9 Last day for seniors
- June 17 Bunker Hill Day: No school
- June 23 (or day 179) Early release for students
- ▼ June 24 (or day 180) Last day of school: Early release for students

- June 24 is the 180th school day, if no days are lost due to cancellations.
 - June 30 is the 184th day required for calendar purposes.
 - No graduation program should be scheduled before June 9, 2010.
- All BPS offices and Family Resource Centers closed.

Fasaxyada Diineed ee Waaweyn

- | | |
|---|--|
| <ul style="list-style-type: none"> Aug. 21* Ramadan begins Sept. 19-20 Rosh Hashanah Sept. 20* Eid al-Fitr Sept. 28 Yom Kippur Oct. 17 Diwali Nov. 26 Thanksgiving Nov. 27* Eid al-Adha Dec. 12-19 Hanukkah Dec. 25 Christmas Day Dec. 26-Jan. 1 Kwanzaa Jan. 1 New Year's Day Jan. 6 Three Kings Day Feb. 14 Chinese New Year | <ul style="list-style-type: none"> March 30 Passover begins April 2 Good Friday April 2 Orthodox Holy Friday April 4 Easter April 4 Orthodox Easter May 9 Mother's Day June 13 Father's Day <p>Observance of Jewish and Islamic holidays begins at sundown of the preceding day.</p> <p>* Estimated</p> |
|---|--|

SEPTEMBER 2009

S	M	T	W	Th	F	S
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30			

OCTOBER 2009

S	M	T	W	Th	F	S
				1	2	3
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29	30	31

NOVEMBER 2009

S	M	T	W	Th	F	S
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30					

DECEMBER 2009

S	M	T	W	Th	F	S
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

JANUARY 2010

S	M	T	W	Th	F	S
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

FEBRUARY 2010

S	M	T	W	Th	F	S
	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28						

MARCH 2010

S	M	T	W	Th	F	S
	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30	31			

APRIL 2010

S	M	T	W	Th	F	S
				1	2	3
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29	30	

MAY 2010

S	M	T	W	Th	F	S
						1
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29

JUNE 2010

S	M	T	W	Th	F	S
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30			

JULY 2010

S	M	T	W	Th	F	S
				1	2	3
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29	30	31

AUGUST 2010

S	M	T	W	Th	F	S
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

► Duruufaha joojinaya iyo/ama cimilada oo xumaatay baa lagama maarmaan ka dhigaya isbedelada kalendaariyaha waqti sanadeedka. Booqo bostonpublicschools.org xaga wixi xog hada jirta.